TAXANAHA DHAXALREEB IV/2008
Diisember 2008 Ponte Invisibile Ed.

# Ruwaanda: Xasuuqii boqolka maalmood




Xasan C. Madar

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga oo laga xidhiidhi karo nabaadiino@yahoo.com.**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabcay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group
Diisember 2008 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay*

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.*

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.*

[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
*Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?*

[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
*Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.*

[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
*Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed*

[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
*"Dhulgariir" waa digniin culus*

[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
*Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"*
*Maansoyahan mudh baxay!*

[9] Xasan C. Madar, Maarj 2008
*Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.*

[10] Aadam Xaaji Cali Axmed, Seebtember 2008
*Bandhig-buugeedka Caalamiga ah ee Hargeysa*

[11] Ayaan Maxamuud Cashuur, Oktoober 2008
*Toddobaadka Fanka iyo Suugaanta Soomaalida ee Landhan*

[12] Xasan C. Madar, Diisember 2008
*Ruwaanda: Xasuuqii boqolka maalmood*

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

## Ruwaanda: Xusuustii Xasan Cabdi Madar

*"Weli seetadii baa ku xidhan saan madoobaha e"*
Timacadde.

Way sii muuqatay, cid walibana way sii arkaysay in xasuuqani dhacayo, cidse dheg u dhigtay dhawaaqii soo yeedhayey iyo digniintii ma jirin. Waddamadii waaweynaa ee Maraykan, Faransiis iyo Ingiriis ugu horreeyeen iyo Qarammadii Midoobay way ka dhego adaygeen wax ka qabashada masiibadan. Kaaga daranta markii xasuuqu bilaabmayna golihii ammaanku wuxu amar ku bixiyey in laga soo saaro ciidammadii tirada iyo tabartaba yaraa ee halkaas ka joogay, halkii ay ahayd in loo diro ciidammo xoojiya si xasuuqa loo baajiyo. Weydiimo badan oo halkaa ka dhashay, ujeeddooyin siyaasadeed oon jirin baa hadheeyey. Jawaabta meesha ku qarsoonayd waxay ahayd in shacbiga Ruwaanda aanay u qalmin in la badbaadiyo.



*Lafihii dadkii lagu xasuuqay Ruwaanda oo lagu ururiyey Matxaf*

Haddii waalidkeen innooga sheekayn jiray colaad innaga iyo reer hebel inna dhex martay, sidaynu reer hebel uga adkaannay, gabayadii marag-kaca ahaa ee goobtaa laga tiriyey, geenyadii uu watay hebelkii geesiga ahaa, maanta xaaladdu sidaa way ka duwan tahay oo adduunkii kala xidhnaa ee belo iyo baas halkooda ku xijaabnaayeen sidii hore wuu iska beddelay waaya aragnimada aynu carruurteenna uga sheekaynaynaana waa mid ka duwan sidii ay ahaan jirtay ama ay ahaan lahayd.

Waxaba laga yaabaa inaanay ubadkeennu wax badan uga baahnayn waayihii colaadeed ee aynu soo marnay oo sida ay ahaayeen iyo qaabka loo xallin jirayba aad uga duwanaa colaadaha maanta dunida nasashada u diiday. Haddii

colaadihii shalay ku xaddidnaayeen laba reer oo oodwadaag le, waxay ay ka dhalan jireenna ahaayeen baad iyo biyo, xilo iyo xoolo oo marka la xallinayo loo kala saari jiray ugub iyo curad, xilo iyo xoolo, dhiig iyo dhaqan, maanta colaadaha jiraa waa kuwo cusub oon cid u abtirisa lahayn. Hubka la kala adeegsanayaa wuu kala baaxad weyn yahay, waa la kala xoog iyo awood badan yahay oo la isma ceshan karo, colaaddu waa mid gondahaaga ka dhalanaysa oo marar badan wax lagugu haysto aanad garanayey, duullaanku waa mid meel fog ka yimid iyo maskax, aqoon, dhaqaale iyo siyaasad la isku haysto, awooddii xoogguna daba taal si lagu muquuniyo cid kasta oo fuunyada iyo faruur-xidhka diidda.

Taasi waxay keenaysaa in ilmaheennu aanu wax badan innaga garowsan doonin waayaha aynu uga sheekaynayno ee ku salaysan laba reer oo dhiig iyo dhaqan wadaaga oo xifaaltan iyo colaad sokeeye dhex taal. Haddii shalay colaad sokeeye ahayd ta dhex taal laba reer oo soomaali ah maanta colaadda Afrika dhextaal oo dhan baa ah mid sokeeye. Xaq buu ilmaheennu u leeyahay inuu innaga garowsan waayo colaadaha sokeeye. Inkastoo ay dhib, culays iyo barakicin ku hayaan, waxa iyana saamayn ku leh waxa meelo badan oo adduunka ka mid ah ka socda oo maalin la arko ka muuqanaya noloshiisa. Haddii awoowyaasheen noloshoodu ku ekayd inta foofka xoolaha, aroorka iyo hayaanka jiilaalka lagu gaadho, noloshooduna ka soo bixi jirtay khayraadka degaankaasi laga helo ee midho, ugaadh iyo cad iyo caanoba leh maanta waxay ku xidhan tahay bariiska iyo baastada ka imanaya orobbo, ameerika iyo eeshiya. Aqoontii halkaasay ku xidhan tahay, meeshiiba tuulo isku muuqata ayaa laga dhigay oo waqtigii iyo fogaantiiba way soo urureeen.

Intaanan hoos u sii daadegin bal aan idinla wadaago Romeo Dallaire, Janaraalkii u madaxda ahaa ciidankii tirada yaraa ee qarammada midoobay ka fadhiyey Ruwaanda sannadkii 1994 oo ka warramaya maalin ka mid ah maalmihii Ruwaanda ee uu goobjoogga ka haa:

> *[1]Markaannu soo dejinnay shixnaddii dadka ahayd waxannu dib ugu soo dhaqaaqnay xagga Kigali annagoo wadanna gaadhi Laanckuser cad oo qarammada midoobay (UN) leedahay. Waxannu ku safraynay jid u halis ah in meel walba nalaga soo toogto. Inta badan dadkii tuulooyinkan dhodhow ku noolaa waa la xasuuqay oo cid kama noola, inta yar ee ka badbaadayna waxay la baxeen wax aan ka badnayn maryahoodii. Toddobaadyo gudahoodna rajo oo dhammi way dhimatay.*
>
> *Halkaa hortayada ayaannu ku aragnay wiil yar oo meeraysanaya. Agtiisa ayaan gaadhigii joojiyey anigoo ka walaacsan inaan ka nixiyo laakiin wax cabsi ahiba may hayn. Wuxu ahaa ilaa saddex jir funaanad jeexjeexan iyo nigis kala googo'an xidhan. Waxa ku dahaadhnaa uskag badan, waxana qariyey daruuro diqsi ah oo si hunguri badnaan ah u weerarayey boogaha jidhkiisa wada daboolay. Wuxu noo soo dhugtay si aamusan isagoo nuugaya wax u eg buskud nafaqo badan. Halkee buu yarku ka helay cuntada dhulkan cidlada ah?*
>
> *Gaadhigii baan ka soo degay oo xaggiisa u dhaqaaqay. Waxa laga yaabaa inay saamayn igu lahayd xaaladda aan ku sugnaa markaa laakiin yarkani wuxu ahaa mid aan waxba kala ogayn. Waxan hore u soo arkay carruur yaryar oo jidhkooda la qurbay laakiin wiilkan jidhkiisii isku dhan yahay waa rajo wanaagsan.*

[1] Shaking Hands With the Devil, Romeo Dallaire

*Hubaal keligii ma badbaadeen. Waxannu isku daynay inaan u dhawaaqno waalidkii ama cid kale oo meelahan ka dhow laakiin jabaq madhan oo geedaha ka duulisay shimbirihii baa dib nagu soo noqotay.*

*Wiilkii ma dhaqaaqin isagoo aamusan oo buskudkiisa jaqaya buu hortayada mutuxnaa isagoo nagu soo eegaya indho balacsan. Weli annagoo rajaynayna inaanu keligii ahayn baan kaaliyahaygii iyo gaadhkii shiishyahanka ahaa diray inay raadiyaan inna wax calaamado nololeed oo halkan ka jira.*

*Intii aannu la cifanaynay baadigoobka mudulada waa hore laga tegay ee jidka ku safan ayaa cabsi i gashay in goobtani noqon karto mid na loo galo. Saaxiibaday way soo noqdeen iyagoon cidna soo helin. Wax baa naga nixiyey, wiilkii baan gacanta soo qabta,y halkii gaadhiga agtiisa ayaannu difaac ka galnay.*

*Waxa kayntii ka soo dhex baxay wiil yar oo kuray- askari 15 jir ah oo aad u hubaysan. Wuxu gartay labbiskayga , wuu i salaamay oo isu kaaya sheegay. Waxan waydiiyey waxa ka yari ahaa iyo in cid nooli xaafadda joogto oo ka yar gacanta ku haysa. Wuxu askarigii yaraa noo sheegay in wiilka yari aanu magac iyo cid midna lahayn laakiin iyagu gacan siiyaan.*

*Taasi waxay i tustay sida uu buskudka ku helay laakiin caafimaadkiisa iyo badbaadadiisuba halis bay ku jiraan. Waxan ku dooday inuu u baahan yahay wax intan ka badan. Waxan askarigii yaraa u sheegay inaanu ku gacan siinno carruur badan oo agoon ah Kigaali oo ay nolol tan dhaanta ku helaan.*

*Kuray-Askarigii wuxu ku adkaystay inaan wiilku meelna tegayn ee uu halkan dadkiisa la joogayo. Waan la sii murmay laakiin wiilkan yar ee askariga ahi diyaar uma ahayn inuu arrinta ka galo dood aan ahayn inay iyagu haynayaan. Cadho ayaa i madax martay markaas oon ogaaday in wiilkii yaraaba farahayaga ka baxay oo aanu meeshaba joogin oo Ilaahay uun ogyahay halka uu tegay.*

*Kaaliyahaygii baa ka daba tegay oo ka soo helay albaabka mudul aan sidaa nooga fogayn isagoo dul fuushan qori tiir ah oo albaabka ku go'an. Waannu daba cararnay. Markaan soo gaadhayna gudaha mudulka ayuu ku libdhay. Tiirkii ku go'naa albaabku wuxu noqday maydka nin mootanaa dhowr toddobaad oo jidhkiisii la qudhmay faash lala dhacay oo hilbihiisa kolba ini lafaha ka fuqayso.*

*Intaan ku dul dhacay maydkii iyo mudulkii ayaa xayn diqsi ahi afka iyo sanka igaga weerartay. Guduhu aad buu u madoobaa oo masiibada hortayda taal waan uriyey mase arkayn. Mudulku wuxu u qaybsanaa laba qol. Mid fadhi iyo madbakh isugu jira iyo mid hurdo qoys ah. Wuxu lahaa laba daaqadood oo lagu sarjaray gidaarka dhoobada iyo sarabta ah. Iftiin aad u yar baa qolka soo gelayey markiise indhahaygu la qabsadeen mugdigii waxan ku arkay badhtamihii qolka maydka qudhmay ee nin, qof dumarka iyo laba carruur ah oo lafa cadcaddi dibedda uga soo baxeen haragga madhay ee aan nafi ku soo dhowaan ee mar ahaa jiidhkii iyo dahaadhkii qofka.*

*Wiilkii yaraa wuxu garab kambadhuudhay wixii ka sii hadhsanaa hooyadii isagoo buskudkiisii jaqaya. Intaan aayar ku soo dhowaaday baan kor u qaaday oo dibedda ugala soo baxay mudulkii.*

*Diirriimaadkii jidhkiisa ee ku dhegganaa jidkhayga ayaa igu xasiliyey nabad iyo deggenaan kor iiga saaray badweyntii halaagga iyo murugada een dhex muquurnaa.*
*Ilmahan yari wuu noolaa balse gaajo daran baa haysay, wuu qurxoonaa balse wasakh*

*baa dahaadhay oogadiisa, wuu dhakofaarsanaa laakiin cabsiyi ma hayn. Maskaxdaydii baan dib ula hadlay. Ilmahani wuxu afarayn karaa qoyskaaga. Maan badbaadin karayn Ruwaanda balse wiilkan yar waan badbaadin karaa.*

*Ka hor intaan wiilkan yari gacantayda soo gelin waxan heshiis kula galay ururrada gargaarka ka shaqeeya iyo dhinacyada dagaallamayaba inaanan oggolaanayn in carruurta Ruwaanda loo qaado meel dalkooda ka baxsan. Marka aan ka hor imaad codsiyada ka imanayey hayadaha samafalka waxan kula doodayey in lacagta boqol carruur ah diyaarad loogu saarayo France ama Beljam inay dhisi karto oo si fiican u wadi karto xarumo agooneed qaada ilaa saddex kun oo agoonta Ruwaanda ah.*
*Wiilkan yar baa meesha ka saaray doodahaygii oo dhan.*

*Riyadaasi waxay meesha ka baxday markii kuray-askarigii yaraa iigu soo haliilay sida Yeyda ee ilmihii yaraa inta gacantayda ka dafay kaynta kula cararay. Annagoon garanayn inta kooxdiisa ah ee shiishka qoryaha nagu soo haya ayaanu aayartii dhalatay annagoon waxba qaban karayn dib ugu noqonay gaadhagayagii Landkruiserka ahaa. Markaan si fudud u dhaqaaqay wax badan baa maskaxdayda ka guuxayey.*

*Dib u gurashadaydaasi dhab ahaan waxay ahayd garasho wanaagsan. Waxan ka fogaaday inaan halis ku geliyo naftayda iyo nafta labadayda askari ku dagaallanka dagaal aan midho dhalin wiil yar dushiis. Laakiin isla daqiiqaddaas waxa ii muuqatay inaan ka baaqsaday ku dagaallanka wixii saxda ahaa oo ah in guuldarradan i hortaal u taagan tahay guuldarrooyinkeenni Ruwaanda oo dhan.*

*Tolow maxaa ku dhacay wiilkaa yar? Ma ka badbaaday dagaalladii tirada badnaa ee dhacayey iyo xasuuqi arxan-darrada ahaa ee galaaftay aabbihii, hooyadii, walaalihii, xigtadiisii iyo in badan oo la mid ah? Miyuu dhintay tolow mise isaga laftiisu hadda waa kuray- askari yar (child soldier) oo ku gacan galay dagaalka u eg midaan dhammaanayn ee ku habsaday dalkiisa?*

*Daqiiqaddaa inankii yaraa oo ku jira gacanta kuray-askari yar oon waxba dhaamin oo walaalkii oo kale ah ay kaynta ku libdheen weli maskaxdayda way ku soo noqnoqotaa. Waa xusuus aan ii oggolaan inaan illaawo sida masuuliyad darrada ah ee aannu ahayn markaan reer Ruwaanda u ballanqaadnay inaan u dejinayno jawi nabadeed u oggolaanayna inay gaadhaan guul waarta.*

Aan u soo noqdo ujeeddadayda iyo xasuuqii Ruwaanda oo aan doonayo inaan wax kooban ka tilmaamo siduu u dhacay, sidii wax looga qaban kari lahaa, sidii loo hagraday iyo sida isaga oo kale durba meelo badan oo dunida ka mid ah uu uga dhacay halkii ugu yaraan uu u noqon lahaa cashar wax lagu qaato.

Goobta aan haddeer taaganahay waa Xarunta Caalamiga ah ee loogu magac daray xoghayaha guud (hore) ee qarammada midoobay, Kofi Annan, ee lagu qaato tababarrada caalamiga ah ee nabad ilaalinta oo ku taal magaalada Akra, Ghana, duleedka badweynta Atlantikada. Xilli ku beeggan duhur dabadii annagoo ka kooban soddomeeyo qof oo ka socda waddamada kala duwan ee Afrika waxanu ku qaadanaynaa casharro kala duwan oo khubaro heer caalami ahi nagu siinayaan. Ujeeddadu waa in naloo tababaro inaannu noqonno khubaro kaalin weyn ka qaata xaaladda nabad ilaalin ee Afrika oo aannu kaalin muuqata ka qaadanno xasilinta iyo horumarinta qaaraddayada oo aannaan mar walba cid shisheeye ah wax ka sugin. Dareenkayaga iyo hankayagu waa heer Afrika iyo

sidii wax loo wada qabsan lahaa. Tusaalaha colaadaha Afrika hadheeyey maaha wax aannu meel fog ka doonayno. Mid kasta oo naga mid ahi ugu yaraan xilli noloshiisa ka mid ah colaaddu gurigiisa way ka saartay iyadoo aanay muuqan sabab macquul ah oo la isku laynayo. Waxa dhinacan galbeedka Afrika nooga muuqda Siiraliyoon, Laybeeriya iyo Ivory Coast oo la isla bas beelay, inta ku hareeraysanina ligliganayso. Dhankaa iyo bariga Afrika oo aan aniguna ka imid waxannu aragnaa holaca ka baxaya Soomaaliya, Itoobiya iyo Ereteriy. Muraaro-dillaac baa noogu xiga marka la soo hadal qaadno sida colaaddu aanay u hambayn dalalkii qaaradda ugu weynaa ee Suudaan iyo Koongo iyo  kuwii ugu yaraa sida Ruwaanda.

Galabnimada bilowga bisha Ogosto 2005, hoolkan xarunta Koofi Annan loogu magac daray ee aanu fadhinno waxa qorshaha noogu jiray daawashada filim qarammada midoobay ka samaysay xasuuqii Koongo ee  in ka badan saddex milyan ku naf waayeen.

Filimku waa mid murugo iyo cabsi ku dheehan. Waxad arkaysaa dadkii wada dhashay oo wax caqligaaga ka weyn isku geysanaya. Waxa la jarayaa xubnaha jidhka ee qofka, Koongo keliya maaha halka masiibada jaadkan ahi ka dhacday, taa tu la mid ah ayaa ka dhacday Siiraliyoon, Ruwaanda iyo meelo kale oo Afrika ah. Intaan idaacadaha ka maqlayey dareenkaygu halka maanta uu joogo marna ma gaadhin, maqal bay igu ahayd maantase muuq baa hortayda taagan. Weliba dareen muuqaalka filinka ka sii culus baa yaal. Markii filinkii dhammaaday. Aammusnaan baa xigtay, tolow ma aamusnaantaas baa lagu kala dareeri? Car waa kuma ka hadli karaa?

Waxa kacay wiil agtayda fadhiyey oo magaciisu Mugisa yahay oo halkaa dadka hortooda isa soo taagay. Dad badani wiilkan ma garanayaan anigase si gaar ah baannu meel u wada degganahay jaamacadda Ghana oo waxbarashada inteeda badan aanu ku wada qaadanno.

Wuxu yidhi, “ta halkaa filinka aad ku arkaysaan maaha been iyo wax la metelay. Aniga laftayda ayey igu dhacday, qoyskaygii anigaa ka nool, xasuuqaa filinka aad ku aragtaan baa ku dhacay. Ha naloo duceeyo.”  Kadibna kursigiisii buu ku soo noqday.

Mugisa meel baanu wada degganahay, muddo bil ah ayuu waayihii ku dhacay iiga warramayey. Hadda wuxu ka soo baqoolay jaamacad ku taal dalka Koonfur Afrika oo uu waxbarasho sare oo xallinta khilaafaadka iyo nabad ilaalinta ku bartaa. Noloshiisa caadiga ah waa nin farxad badan. Ma dareemaysid in wax ka maqan yihiin. Ninkan maanta na hortaagan ee ka marag kacaya masiibada ku habsatay reer Koongo isagaba maaha. Waa wax caqliga ka weyn in qof nool xubnihiisa la jarjaro oo qofka loogu roon yahay marka gacanta la jarayo la dooransiiyo ma gacmo gaab baan kaa dhigaa mise gacma dheere iyadoo tusaysa kolba halka gacanta lagu jarayo.


Maanta kama warramayo Koongo balse aan u soo noqdo halka aan u socdo oo ah dalka Ruwaanda.

Hadda dalku waa Ruwaanda. Magaciisu wuxu u taagan yahay dalkii kunka buurood. Wuxu ka mid yahay waddamada Afrika ugu quruxda badan uguna

cagaaran, saa waxabu ku yaal gobolka harooyinka waaweyn. Dadka ku nool waxa ugu badan labada qoomiyadood ee Hutu iyo Tutsi. Tutsigu kama badna boqolkiiba shan iyo toban balse waa dad aad ugu horreeya xagga tacliinta. Ilaa toban milyan oo qof baa ku nool Ruwaanda. Wuxu ka mid yahay waddammada ugu cidhiidhisan dunida marka la isu eego tirada dadka ku nool iyo baaxadda dhulka.

Xasuuqii ugu xumaa taariikhda ayaa qoomiyadda tirada badan ee HUTU isku dayeen inay ku dabarjaraan qoomiyadda laga badan yahay ee Tutsi ee ay dalkaasi wada degaan. 800,000 kun oo qof oo rayid ah ayaa 100 maalmood gudahood lagu xasuuqay. Iyagoo ku hubaysan faashash oo ah dad si habaysan loo soo diyaariyey ayey malleeshiyaadkii HUTU ee dawladdu dabada ka wadday maydkooda ka tallaabsadeen dad rayid ah oo Tutsi ah oon waxba galabsan cidda ay yihiin darteed. Intay waxaasi dhacayeen nabad ilaaliyayaasha caalamiga ah ee qarammada midoobay goobta ayey ku sugnaayeen iyagoon waxba ka qabanayn. Xasuuqaa Ruwaanda wuxu daboolka ka qaaday tabardarrida iyo awood la'aanta ururrrada caalamiga ah ee ay kaga baaqsadeen ka hortagga iyo wax ka qabashada arrimaha jaadkaas ah.

Kofi Annanka xaruntan aannu joogno loogu magac daray laftiisu marka xasuuqaas Ruwaanda dhacayey wuxu ka mid ahaa saraakiisha ugu sarraysa qarammada midoobay weliba wuxu madax ka ahaa qaybta hawlaha nabad ilaalinta. Waxa lagu eedeeyaa inuu wax ku lahaa masuuliyad darrada ka dhacday Ruwaanda kadib markuu ciidankiisa kala soo baxay saddex bilood ka hor xasuuqa isagoo ogaa in xasuuqani sii qorshaynsaa iyo halista dad rayid ahi ku jireen, wax tallaabo ka hortag ahna aanu qaadin.




*Sawirku waa madaxweynihii labaad ee soo mara Ruwaanda.waxa ku garab sawiran faashkii wax lagu xasuuqayey oo dhinaciisa lagu qoray: Hub jaadkee ah baan u adeegsanna dabargoynta Baranbarada- Tutsiga.*

Warbaahintu, gaar ahaan jaraa'idka iyo Raadyowga dawladdu, kaalin weyn bay ku lahaayeen xasuuqa oo shidaalka ku sii shubeen halka warbaahinta caalamiga ahi indhaha ka qarsatay ama si qaldan uga warrantay. Jaraa'idka Ruwaanda wuxu huriyey nacaybka loo qabo Tutsiga iyadoo raadyowguna ka xigtay. Wargeyska Kangura ee dawladda ayaa shidayey nacaybka ugu daran ee Tutsiga. Wuxu soo sawirayey faashashkii lagu layn lahaa Tutsiga iyadoo ciwaan uga dhigaysay ereyo dareenka kicinaya sida, hub noocee ah baan u isticmaalnaa si aan u cidhib tirno Baranbarada- oo ay ula jeedeen Tutsiga.

Dadka oon aad wax u akhriyin darteed raadyowga ayaa u ahaa dawladda aaladda ugu muhiimsan ee ay farriimaheeda ku gudbiso. Arrintani waxay dib kuu xusuusinaysaa warbixintii Africa Watch dhammaadkii sannadihii siddeetanaadka xilli xukuumaddii markaa Soomaaliyadii waqtigaa ka talinaysay ay si naxariis darro ah birta uga aslaysay dadkii rayidka ahaa ee ay u talinaysay. Warbixintaa Africa Watch waxa ciwaankeedu ahaa "Dawlad dadkeeda dagaal kula jirta".

Labada idaacadood ee kicinayey colaadda intii xasuuqu socday waxay ahaayeen raadyow Ruwaanda iyo Radio Télévision Libre des Mille Collines(RTLM). Markaas bay bilaabeen Hutu-gu iyagoo askartii horkacayso inay bilaabaan xasuuqa Tutsiga.

Xasuuqan iyo kuwa la midka ahba in badan waxa u sabab ah taariikh la qalday, taariikh la mariyey meel aan meesheeda ahayn, la marin habaabiyey oo shisheeyihii Afrika ku soo duulay siduu doono meeshu rabo u mariyey. Waa marka hadday ummadi taariikh la'aan noqoto ay ugu tasowdo nolosha ee ay dib ugu meeraysato raadkii ay ay soo martay.

*Ma darraato raadkaan dhigaan dib ugu soo laabtay,*
*sidi aan dayeysnahay miyaan dawgi ka habaabay*
- Qaasin-

Waxyaabaha idaacaddaasi baahinaysey waxa ka mid ahaa in madaxweyiniihii Hutu-ga ahaa oo shil diyaaradeed ku dhintay sabab kastaa ha jirtee ay u dhigeen in la jidh dilay, la dhufaanay oo waxaa Tutsigu sameeyey. Waxa kale oo ay baahiyeen warar qaldan oo ku sheegaya inay Tutsigu yihiin shisheeye aan dalka u dhalan oo sed bursi ay ka heleen dhaqaalihii iyo awooddii dalka. Labadan idaacadoodba waxa loo adeegsaday inay dadka kiciyaan oo si cad ugu tilmaamaan dadka sidii xasuuqa loo fulin lahaa.

Markay talo fara ka haadday ee qaramada midoobay ciidammadii tirada yaraa ee halkaa ka joogay ka urursatay waxa isku soo baxsaday faashkii dabargoynta ee sida garaad darrada ah loogu geliyey gacanta Hutu-ga iyo baaqigii ka hadhay Tutsiga. Marka halkaa xaal marayo waxa xoog ku soo farageliyey hoggaamiye Paul Kagame oo qoomiyadda Tutsi ka soo jeeday iyo Jabhaddiisii RPF. Paul Kagame bilowgiiba wuu sii arkayey xasuuqa meesha ka socday, in badanna wuu kala hadlay taliska qarammada midoobay sida uu sheegay Romeo Dallaire oo ahaa janaraalkii UN-ta halkaa u fadhiyey balse waxa mar walba hortaagnaa kuwa isku sheega bulshada caalamiga ah iyo quwadaha waaweyn ee reer galbeed ee ay ugu horreeyaan Faransiiska iyo Biljam iyo Maraykanka oo isagu mar walba ku adkaysanayey inaan xaaladda lagu sheegi karin xasuuq (genocide).

Markii is dhegatirkii caalamku batay waxa arrintii degdeg u soo faro geliyey oo ciidankiisa hore u soo dhaqaajiyey Jeneraal Paul Kagame oo markaa ahaa hoggaamiyaha jabhadda RPF. Paul Kagame wuxu xoog ku soo afjaray badiba xasuuqii waxanu ka adkaaday xoogaggii sida naxariis- darrada ah dadka u gumaadayey.




*Madaxweynaha Ruwaanda, Paul Kagame*

Kadib markii ay guusha heshay jabhaddii RPF ee uu hoggaaminayey Paul Kagame waxa la dhisay dawlad loo dhan yahay. Dawladdani waxay mamnuucday in la isu kala saaro isir oo reer Ruwaanda dad qudha oo walaalo ah yihiin.

Bishii March 1988 madaxweyne Clinton-kii Maraykanka ayaa booqasho uu ku tegay Ruwaanda kula hadlay dadweynaha gegida diyaaradaha ee Kigali isagoo ka cudur daaranaya wixii dhacay iyo sidii ay uga gaabiyeen" Waxan halkan maanta u nimid inaan garowsanno inaannaan annaga-Maraykan, iyo bulshada caalamiga hi aannaan wax badan oo aannu qaban kari lahayn ka qaban si aan u xadidno wixii dhacay."ayuu si yaxyax leh u yidhi.

Madaxweyne Clinton wuu sheegay sida uu ugu guuldarraystay hawshan balse raalli gelin kama bixin sidii Maraykanka iyo caalamku uga gaabiyey wax ka qabashada masiibadan..Waa la dhegaystay, khudbaddiisiina wuu dhammaystay laakiin dhego u diyaarsan kumay dhacayn, sacabka bilaa ujeeddada ah ee loo garaaco cid kasta oo fagaare isa soo taagta ka badanna goobta kama helin.

*"Inta maanku gaajaysan yahay guuli waa weliye"*
Hadraawi

Hadday xataa calooshu dheregto waxaan dhergayn garaadka oo baahidu mar walba way taagan tahay. Waxa maqan aqoon u gaar ah Afrika oo iyadu leedahay oo ay ku meel marto. Gacan shisheeye ayaa tooshka u sidda oo u ifinaysa inta ka horraysa jidka ee aragga indhuhu gaadho. Ma oga waxa hareeraheeda ka socda. Aragga gaaban mooyee waxa ka xidhan aragga fog. Qalbiga wax kama aragto. Markii la doonana tooshka waa loo bakhtiiyaa. Masiibadaa Ruwaanda ka dhacday ee aynu sida kor ka xaadiska ah u dul marnay, innagoon dib ugu noqon heerarkeeda taariikheed iyo kaalintii gumaystuhu ku lahaa oo ay ahayd in wax lagu barto oo aan god laba jeer lagaa wada qaniinin, Afriki kumay guulaysan inay ka badbaaddo hadday tahay mar kale iyo Darfuur iyo Koongo iyo inta kale oo aan dammaanad nabadeed haysan.

Ruwaanda maanta dadku nabad bay ku wada nool yihiin. Intii xasuuqa bartilmaameedka u ahayd balse ka badbaaddayna inkastoo ay ku waayeen xubno qoysaskooda ka mid ah iyo dadkii ay jeclaayeen, waxay la nool yihiin xusuustii iyo ladhkii wixii ay indhahooda ku soo arkeen. Murugada iyo damaqa xasuuseed kama madhna maskaxdooda balse waxay go'aansadeen inay halkaa ku illaawaan wax kasta oo daran oo soo maray iyagoo eegaya danta guud ee reer Ruwaanda, wanaagga nabad ku wada noolaanshaha iyo aayaha faca soo koraya. Waxa la go,aansaday isa saamax, wada noolaansho, dib u heshiin, wax wada cun, wax wada barasho iyo wada qosol balse waxaan la hubin in faragelin shisheeye oo mar kale dacartii naxliga dib u soo noolaysa laga badbaadi doono.

---



Xasan Cabdi Madar wuxuu deggan yahay Hargeysa, Somaliland.